Our Voice

Sponsored by the Department of Education via Contact a Family

Qaamuus

Glossary Of Terms for the SEND Code of Practice 2015 and the Children and Families Act 2014

Dib u eegista Sanadlaha

Annual Review

Dowladda Hoose waxaa ku waajib ah in dib u eegta ilmahaaga/ qafkaaga dhalinyarada ah (I/ Q DH) qorshahiisa ugu yaraan 12 bilood kasta. Inta lagu guda jiro dib u eegista, I/Q DH, waalidka daryeelayaasha iyo xirfadlayaasha waa inay dib u eegaan horumarka I/ Q Dh.

Doonista

Aspirations

Rajo ama hami oo aad wax ku gaarto sida, aadista dugsi sare ee loo yaqaan college, isku filnaasho sida ugu macquulsan, inaad leedahay saaxiibo iwm. Ma aha inay noqdaan macquul inta ilmaha yar yahay, laakin marku ilmaha weynaado, waa inay uu dhowaato wuxu ilmaha xaqqiqdi sameyn karo ama gaari karo.

I/ Q Dh

C/YP

Ilmaha & dadka dhalinyarada ah ama ilmo/ qof dhalin yar

'Qof dhalin yar' waa qof ka weyn da'da waajibka ee iskuulka (16) iyo waa mid ka yar 25 sano. Tan waxaa looga jeeda waa inay gaareen 16 sano ka hor jimcaha ugu dambeeya oo bisha Juunyo ee sannad dugsiyeedkaas. Si loo helo tixraac fudud, dhalinyada waxay u gudbaan dhinanca Is afgaradka Dhaqanka (Code of Practice) "in ka wayn 16".

Kooxda Gudigga Caafimaadka (KGC)

Clinical Commissioning Groups (CCGs)

Waxa dusha ka maamula NHS England, CCGs oo ah ururo NHS ka mid ha oo masuul ka qorshaynta iyo iibsashada inta badan adeegyada isbitaalada iyo bulshada hoos imaada NHS-ta ee u fidiso xaafadaha. Adeegyadaas waxa ka mid ah Okubashinal terabiiga, Isbiij terabiiga, fiisiyo terabiiga iwm. Xubnaha ka mid waa rugta dhaqaatiirta, iyo xirfadlayaasha kale, sida kalkaalisooyinka iyo la taliyeyaasha.

Contact: 07516 662315 Email: info@ourvoiceenfield.org.uk or chat to us on facebook.com/ourvoiceenfield

BWQN Afgaradka Dhaqanka (BWQN afgaradkooda ama BWQN ADh)

SEND Code of Practice (SEND Code or SEND CoP)

BWQN Afgaradka Dhaqanka wuxuu sharxayaa sharciga la xiriira Qeybta 3 oo Children and Famiies Act 2014 (Qanuunka Caruurta iyo Reerka 2014). Waxa ay la xiriirta dhalina iyo ciyaalka qaba baahida waxbarasho ee khaaska an (SEN) iyo naafada.

Wax isla soo saarista

Co-Production

Waa In lagu shaqayo hab lagu hubsanayo in caruurta, dhalinta, waalidiinta iyo xirfadlayaasha dareemaan iney si buuxda lug ugu leeyihiiin oo ayna masuul ka yihiin, go'aamada iyaga sameeya, sida darteed waa inay dareemaan in go'aamadooda iyaga ' gaar ah' u yihiin.

Naafada

Disability

Qofka waxaa loo arkaa inuu sharci ahaan naafo yahay haddi uu qabo wax jirka ama maskaxda ka curyaamiya oo ah wax 'la taaban karo' iyo wax 'waqti dheer' soo hayey (in ka badan 12 bilood) oo si xun u saameeysa awoodiisa uu ku qabsan lahaa wax yaabaha nolol maalmeedkiisa ah.

QWCD (Qorshaha Waxbarashada Caafimaadka iyo Daryeelka)

EHCPs

QWCD ama EHCP (Qorshaha Waxbarasha Caafimaadka iyo Daryeelka) waa dokumenti sharci ah oo sharxaya waxa uu ilmahaaga qabsan Karin iyo sidoo kale waxa uu qabsan karo; waxa u nalooshasiisa rabo inuu sameeyo iyo caawinaada uu u baahan yahay inuu ku gaaro hadafkaas. Waa inuu ku caawiyo dokumentigan inuu u diyaar garoobo marki uu ilmaha noqda qof weyn oo qaangaar ah.

Dalab Deegaan

Local Offer

Dowlada hoose waxaa waajb ku ah inay soo daabacdo Local Offer (Dalab Deegaan), oo ah macluumaad laga helo Council (Golaha) websaaytkooda, waxaad hal meel ka heli kartaa, waxa diyaarka ku ah guud ahaan waxbarasha, caafimaadka, iyo daryeelka ilmaha iyo dhalinta qabta SEN ama naafada ee hoos yimaada degaanka xaafadaas.

Degaanka Xaafadda

Local Area

Degaanka xaafadda (Local area) waa degmada aad ku nooshahay waxayna ka mid tahay golaha (council) iyo sido kale Kooxda Guddiga Caafimaadka (KGC). Adeegyada NHS-ta ee degaanka sida isbitaaladda, GP-yada, dugsiyada iyo college-yada iwm.

Dowladda Hoose/ Golaha

Local Authority/Council

Waa urur sharciyeeysan oo masuulka ah sida bixinta adeegyada bulshada sida ururinta canshuuraha iyo qashinka iyo nalalka wadooyinka, warshadaynta, daryeelka, guryaha, xadiiqadaha, basaska iskuulada iwm oo ah degaanka aad ku nooshahay.

Dhexdhexaadin

Mediation

Waa urur madax banaan, adeegyada sharciga waxay u yihiin lacag la'aan waalidiinta (waxa bixiyey Dowladda hoose) si loogu caawiyo xalinta qilaafaadka ka dhaxaysa waalidiinta/ dhalinyarada iyo

dowladda hoose ee oo ah dhinaca WCD (EHC) qiimaynta baahidda iyo qorsheyaasha.

Waalidiinta ama dhalinyarada keliya ayaa isticmaali kara adeegan haddi aanay ku faraxsannayn go'aamada la gaaray:

- Ma loo isticmaali karo fulinta qiimeeynta baahidda WCD, mana aha mid loo isticmaali karo isku duba ridka qorshaha WCD
- Ka dib marki ay helaan qorshaha ugu dambeeya ama kan la bedelay,Ka dib marki la go'aamiyo in aan la bedelayn qorshaha WCD ama
- Go'aanka in ay joojiyaan si ay u ilaaliyaan qorshaha WCD.

Waa inay isticmaalaan adeegga ka hor inta aysan go'aansanin inay rafcaan Qeybta Kowaad ee Maxkamadda

Iyadoo la tixgalinaayo Caafimaadka iyo Daryeelka urur hay'ad kasta waxay yeelan doontaa wax u gaar ah nidaamka rafcaanka ama abbiilka ah.

- Baddal qorshaha WCD ama waa inay go'aanka joojiyaan si ay ilaaliyaan qorshaha WCD.

Baahida

Needs

Caqabaddaha ama dhibaatooyinka ka hor istaagaya qofka inuu sameeyo waxa ilmaha caadiga ah oo ay isku da'da yihiin uu sameeyn karo. Ma aha cudurka ama calaamad, laakin waa dhibaatooyinka kusoo gudboonada sida qofka isticmaala kursiga curyaanka, baahidooda waxay u arkaan in ay ku adag tahay socodka.

Qiimaynta Baahida WCD

EHC Needs Assessment

Qiimaynta baahida WCD waa hab lagu fahmo farqiyadda u dhexeeya I/Q Dh kartidiisa hadda iyo dadka ay isku da'da yihiin waxay sameeyn karaan caadi ahaan.

Natiijooyinka

Outcomes

Waxa loola jeeda natiijadda dhamaadka; waxa I/Q Dh hadda sameeyn Karin, laakin haddi uu caawinaad iyo taageero helo inuu awood u yeesho inuu mustaqbalka sameeyo sida, Waxaan qabsan kara qaadada iyo wuxu cuni kara cuntada keligiis marki aan gaaro 6 sano. Ama Waan aqrin karaa oo waan sameeyn kara cuntada sida loo dubo doolshaha aniga keligeey marki aan gaaro 15.

Waxay yihiin muddo dheer sida caadiga ah (ka badan 12 bilood) oo waa in ay ka caawiyaan I/Q Dh oo ka shaqeeyaan ilmaha rabitaankooda. Sidoo kale waxa loo qoray si fudud oo ay u fahmi karaan I/Q Dh iyo waalidiinta.

Miisaaniyadda Shaqsiyeed ama MSh

Personal Budgets or PBs

Dadka dhalinyarada ah iyo waalidiinta ilmaha ee u bedelanaya Qorshaha WCD waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan Misaaniyadda Shaqsiyeed laakin xaq uma laha si toos ah inay u helaan tan.

Waa qadar lacag ah oo ay ku heshiiyeen Dowladda Hoose in la siiyo, ama in loo hayo oo wakiil looga noqdo, waalidiinta ama qofka dhalinta yar si loogu caawiyo inuu ku gaaro natiijadiisa. Waa waajib in loo isticmaalo si loogu iibiyo gargaar ama taageero ku qoran qorshaha WCD.

Qofka waxa Quseeya

Person Centred

Qofka waxa quseeya micnahooda waa "inaad dhagaysato oo aad fahanto qofka, inaad ku fakirto oo aad sidooda wax u aragto, inaad iyaga qorshayso taageeradooda, adiga oo iyaga muhiimada ugu weyn ee dhexda ah ka gelinaya go'aamada quseeya noloshooda.

Waxqabadka loo baahan yahay waa in ay laga baahi tiri karo tusaale ahaan helida waa in lagu taagero helida adeegyada Fisiyo terabiga, haddi qalab looga baahan yahay, ama istaraatiijiyad sida wada shaqaynta koox yar oo kooban ama qof saxiib oo kale ah.

Fal Bixinta

Provision

Waa fal bixin (wax barasho) oo ka duwan ama ku dheeraad ah sida caadiga ah waxa diyaarka u ah oo ay u baahan yihiin ardayda ay isku da'da yihiin.

BWGN (Baahida Waxbarashada Gaarka ah iyo Naafada)

SEND

Baahida Waxbarashada Gaarka ah iyo Naafada. Ilmaha haysta baahi gaara ee waxbarasho haddi ay ku adag tahay waxbarashada ama uu ku qabo naafo dhinaca waxbarashada waxay ku baaqaysa in loo sameeyo waxbarasho khaas ah.

Waxay waxbarashada ku adag tahay ama ay naafo ka yihiin haddi

- ay si weyn ugu adag tahay waxbarashada oo ka badan aqlibiyadda dadka da'dooda ah, ama
- ay qabaan naafo ka hor istaagaysa ama ciriiri gelinaysa iyada ama isaga in ay isticmaalaan wax yaabaha dadka da'dooda ay sida caadiga ah isticmaali karaan.

BWGN Taageero

SEND Support

Marka la ogaado in ardayga uu haysto baahi waxbarasho gaar ah, iskuulka ama dugsiga uu dhigto waxaa waajib ku ah inay tilaabo qaadaan oo ay ka leexiyaan caqabddaha hor istaagan ee waxbrasho iyo waa inay u sameeyaan markaas fal bixin ah waxbarashada gaarka.

Moowqif

Targets

Sida caadada ah kuwani waa naatijooyinka muddada gaaban lagu gaaro ama waa ujeedooyinka yar yar oo ka waqti ahaan ka yar 12 bilood.Waxay sal dhig u yihiin qorshaha heerka iskuulka, halkaas oo dib loogu eego si joogta ah/ teeram kasta iyo waa in qeyb looga gaaro natiijooyinka lugu heshiiyey oo ku qoran QWCD.

U gudbinta Kulanka dib u Eegidda/ Kulan Isbedel

Transfer Review Meeting/Conversion Meetings

Haddi I/Q Dh uu haysto Isteetmentki Baahida ee Waxbarasho, Waxa loo bahan yahay in la helo Qiimeynta Baahidda ama Ugudbinta Kulanka Dib uu Eegidda, oo lala kaashanayo waalidiinta/dadka masuulka ka ah, I/Q Dh iyo xirfadlayaasha la shaqeeya ilmaha si la isugu afgarto Natiijooyinka iyo Hamigooda (ku salaysan Qeybta A ee Qorshaha ama Plan-ka), sidoo kale baahida uu ilmaha qabo iyo fal bixinta lasoo jeediyey.

Email: info@ourvoiceenfield.org.uk